**Sharci lamba. 6 ee 30 Sebtember 1956**

**Soo bandhigga tirakoobka dadweynaha ee dowladaha hoose.**

## MAAMULAHA

Isagoo garowsaday ansixidda Golaha Xeer Dejinta.

## WAXAA LA AMRAY

Sharcigaan halkaan ku qoran:

### Qod. 1
### Xafiisyada Diiwaanka Dadweynaha

Degma kasta waxaa laga dhisay Xafiiska Diiwaanka dadweynaha oo ka baxsan aaga dowladdaha hoose kuwaas oo noqon kara baahida loo qabo darted kuwa qeybo badan ka kooban.

Qeybhaha waxa hoos yimaadana Xafiisyada Degmooyinka. Xafiis kasta ee Qeybaha Gobollledka waxaa laga ag dhisay Xafiiska Dib-u-eegidda iyo Baarista oo si toos ah u maamulo Guddomiyaha.

Soo bandhigga tirakoobka diiwaanka waxaa mas'uul ka ah Guddomiyeyaasha Degmooyinka waana in la dhameeystira 12 bilood gudahooda maalintii la bilaabay, muddadasi oo lagu soo shaaci doono dekreeto u gaar ah eek a soo baxo Wasaaradda Arriaha Gudaha.

### Qod. 2
### Howlaha Xafiisyada Qeybahooda

Guddomiyada Degmada wuxuu amar-sharci kadib markii uu amar ka helo Wasiirka Arrimaha Gudahaua dhisi doonaa xafiisyada qeybahooda wuxuuna carifi doonaa howlahooda.

Si uu qayaxo awoodaha iyo howlaha xafiisyada qeybooda wuxuu tixgelin doona qaabka dadka deegaan u kala duwan yihiin, sida uu deegaanku yahay iyo qaababkiisa.

### Qod. 3
### Qaabka dhismaha ee Xafiisyada Diiwaanka Dadweynaha

Xafiisyada Diiwangelinta Dadweynaha waxay ka kooban yihiin:

— Guddomiyaha Degmada – Madaxa Xafiiska;
— Shaqaale oo leh awoodda Ku xigeenka Madaxa Xafiiska;
— Laba kale shaqale.

Waaxda waxay ka kobanaan doonaan:

— Shaqaale – Madaxa waaxda;
— Shaqaale kale.

Xafiisyada Dib u eegidda iyo kormeerka waxay ka kooban yihiin:

— Guddomiyaha (ama ciddi metelysa) - Madaxa Xafiiska;
— Shaqaleh oo le h awood Ku xigeenka Madaxa Xafiiska;
— Shaqaale kale.

**Qod. 4**
**Howlaha Bandhigga Diiwanka Dadweynaha**

Howlaha soo bandhigga diiwaanka waxay ku hirgeli doona sida soo socota:

— Soo bandhig;
— Qorista iyo kormeerka;
— Dib-u eegis iyo baaris.

So bandhigga waxaa fulin doono Madaxa mushaarka ku qaato oo howlahoodu ay ka mid tahay in ay soo bandhigaan.

Qorista iyo kormeerha waxaa iska Xafiisyada Degmooyinka.

Baarista iyo dib-u-eegista waxaa hubiya xafiisyada Gobollada.

**Qod. 5**
**Soo Bandhiggayaalka oo uu Guddomiyaha Degmada soo Magacaabo**

Guddomiyaha Degmada, isagoo haysta amarka Wasiirka Arrimaha Gudaha wuxuu si qeyro caadi ah u soo magacaabi doonaa “soo bandhigeyaal” oo ka duwan kuwa lagu tilmaaman qodob sare ku xusan markii arrimahasi ay khuseen kooxo jinsi ahaan ka duwan amase aanan lahayn Madax mushaari ah, soo bandhiggeyaashu waa in ka tirsan yihiin kooxaasi ama tulooyinka la daneynaaya.

**Qod. 6**
**Gunnoyin iyo Magdhaw**

Madaxda mushaariga ah waxay xaq u leeyihiin gunnoyin. Soo bandhigayaalka oo aan mushaari ahayn waxay xaq u leeyihin magdhaw. Tirada gunnada iyo magdhawga waxaa qaxiyi doono Wasiirka Arrimaha Gudaha isagoo la tashtay Wasiirka Maaliyadda.

**Qod. 7**
**Qorallada Diiwan Gelinta**

Qoraallada loo baahan yahay in la dhameeystio markii howlaha diiwan gelinta waxaa ka mid ah:

— Liiska bandhigga qoraalladda;
— Diwaanka dadweynaha;
— Tirada Shaxda.

**Qod. 8**
**Liiska soo Bandhigga**

Liiska soo bandhigga oo laga doonayo in ay qof kasto laga soo qaado macluumaadka ka mid ah:

— Jinsi;
— Magaca;
— Naynaasta;
— Magaca hooyada;
— Magaca aabaha;
— Magaca awoowaha;
— Haddii magac dheerad ah jiro;
— Taariikhda iyo goobta dhalashada.

Liiska waa in lagu qoro laba nuqul , mid lagu reebi doono Xafiiska Degmada midda kale loo celin doono soo bandhigaha kadib markii laga shabbadeeyey Xafiiska Degmada.

Lisaska macluumadka oo lagu keydin doono xafiiska Degmada waxaa ciddii daneyneysa ay waqti kasto ka arki karta halkaas.

Ciddii dood ka qabto liskakaasi waxay u dacwon karta Xafiiska Guddomiyaha degmada oo wixii fal ah ee loo bahaan yahay ka qaban doono.

**Qod. 9**
**Diiwanka iyo Shaxda**

Diiwaanadda iyo shaxduba waxaa lagu hayn doona Xafiisyada Degmada Diiwaanada waxaa loo buuxin doona hadba sidii ay ugu soo kala horeeyen macluumadka oo dib loo eegay.

Shaxyadu waxaa loo kala dhigi doonaa si xuruuf ahaan.

**Qod. 10**
**Cusboneysiinta Macluumaadka**

Ugu yaraan 3dii biloodba mar ayaa soo bandhigeyaalku soo wargelin doonaan Xafiiska Degmada wixii is beddel oo ku yimaaden diiwaanka dadweynaha ee la xirira dhalashada, geerida, dhoofista, guurka furrinka, soo deggidda dad cusub oo kooxda ama goobta ay mas'uul ka yihiin laga helay.

**Qod. 11**
**Dib- u- eegidda iyo Baarista**

Xafiiska Dib-u-eegista iyo Baarista wuxuu:

— Ku dhaqaaqi doona baarista diiwanadda lagu haayo Xafiiska Degmada;
— Baarista mar mar ee Xafiiska Degmada;
— Isu bar bar dhigga diwaanadda dadweynaha ee waxyada degmada;
— Isku duba ridka shaqaalaha xafiiska diiwanka dadweynha.

**Qod. 12**
**Dadweynaha Reer-miyiga ah**

Qorista dadweynaha reer miyiga ama isku jirka ah waxaa iska hal wax ee ka tirsan Xafiiska Guddomiyaha Degmada, haddii dhaqaaqoodu uu ku eg yahay xadka hal degmo, Haddii dhaqaaqo uu gaarayo degmooyin kala duwan laakin kawada tirsan hal gobol waxaa iska leh Gobolkaasi, haddii dhaqdhaqaaqi uu garsiisan yahay dalka oo idil waxaa iska leh Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

**Qod. 13**
**Wajiibaadka Howlaha soo Bandhigaha**

Madaxda mushaariga, howlahiisa soo bandhigga waa qassab, waxaa keliya laga baajin kara sababo adag awgeed. Waxaa ka baajin kara oo keli Guddomiyaha Degmada ama Guddomiye kale go'aanadooduna waa mid kama dambeys ah.

Madaxda mushaariga ah oo diidaan in ay ku shaqeeyaan sidii soo bandhige waxaa laga qaadi doona xilka Madax mushaari ah.

**Qod. 14**
**Ciqaabta soo Bandhiyaalka aan Gudanin Xilkooda**

Soo bandhigeyaalka keena macluumad qaldan ama kala dhiman waxay muteysan doonaan ganax ilaa So. 200.

Ganaxaasi waxaa la gaarsiin karaa ilaa iyo So. 2.000 hadii ay diidan in ay u hoggansandaan amarka ah in ay soo ururiyaan macluumada la weydiiyey ama ay liiska soo qori waayaan.

Waxaa sidoo kale la gaarsin kara ilaa So 2.000 haddii ay diidan in ay ka soo qeyb qaatan howlaha dib-u-eegidda ama dhameeystirka macluumaadka.
Amaraadan sare ma reebayaan in ciqaabaad kale oo idaari ah la kor dhigo.

**Qod. 15**
**Ciqaabaha Dadka hor Istaago Howlaha soo Bandhigaha**

Kadib markii laga reebo marxaladaha sare ku xusan waxaa kale oo ganax So. 100 muteysan doono, ciddi, si kastaba ha ahaatee hor istaago, ama isku daya in uu hor istaago howlaha soo bandhigga ama been abuur ka suubiya natiijoyinkiisa.

**Qod. 16**
**Amarada Fulinta**

Wasiirka Arrimaha Gudaha ayaa u xilsaaraan in uu ka soo saaro amarro hirgeliya sharcigaan.

**Qod. 17**
**Kharajka soo Bandhigga**

Wixii kharaj ee la xiriira fulinta Sharciga waxaa laga soo bixin doona qeybta misaaniyada u qaabilsan ee sanadka 1957.

Sharcigaan waxaa lagu keydin doona Keydka Rasmiga ah ee Sharciga waxaa lagu shaacin doona Faafinta rasmiga. Waxaa la faraaya cid kasto in ay u hoggansanato sharcigaan una hoggamiso cid kasto sidi sharci Dalka Somaliya.

Muqdisho, 30 Sebtember 1956.

**Anzilotti**

**Haji Muse Boqor** **Cabdullahi Ciise Moxamud**